Dal dad waayey iyo duni damiir beeshay, Soomaaliya dib ma u dhalan doontaa?

Buug soo bandhigay weydiimo iyo bareerayaal ugub ah oo ku wajahan dib-u-yagleelidda Soomaaliyadii dhimatay…

"Baraarujin aayeliyo, Waxaan jrin baaq waddaninimo, Dadkiisa u soo bandhigay, Si ay berri ugu hirtaan, Bur bay ku jirtaa arrini, Kan bixiyaa waa sugaal…" (Cabdulqaadir Cabdi Shube)

Qalinkii: Cabdulqaadir M. Wacays

Email: cmwacays@yahoo.com

Hordhac..



"Waa buuggii loo baahnaa oo kusoo beegmay waqtigii loogu baahi badnaa," sidaas waxaa isku raacay waxgaradkii kala duwanaa ee falcelinnada ka bixiyey buuggan uu cinwaankiisu yahay "*Dal dad waayey iyo duni damiir beeshay, Soomaaliya dib ma u dhalan doontaa?*" ee uu qoray Dr. Maxamed Daahir Afrax. Waxgaradkaas oo ay ku jireen shaqsiyaad magac iyo maamuusba ku leh ummadda Soomaaliyeed dhexdeeda, waxay kaloo si adag ugula taliyeen qof kasta oo ka damqanaya dhibaatada Soomaalida amaba xitaa ugu yaraan daneeya arrimaha Soomaaliya in uu buuggan akhriyo.

Ka sokow falcelinnadaas dhiigga ku dhaqaajinaya ee ay qoreen waxgaradkii buuggan akhriyey, waxaa aniga si gaar ah damiirkayga u gilgilay, iguna dirqiyey in aan akhriyo waa qaylo-dhaanta ay xambaarsan tahay dhudda seddexaad ee cinwaanka buuggan: *"Soomaaliya dib ma u dhalan doontaa?".* Waa hubaal, sida buuggaba ku cad, in illaa iyo haatan aan lagu guuleysan baadigoobka furayaasha albaabada ay ballaqayaan labada dhudood ee hore, waana taas sababta dhalisay in la is-weydiiyo su'aasha ah: *"Soomaaliya dib ma u dhalan doontaa?".*

Waa dhab in dad badan ayan weli u kala baxsanayn farqiga u dhexeeya "Dib-u-dhalashada Soomaaliya" iyo "Dib-u-dhalashada dowlad Soomaaliyeed", waxaana suurtagal ah in dadkaasi qacda ugu horreysa oo ay buuggan arkaan ay hoosta iska weydiiyaan: "Oo waa maxay Soomaaliyada dhimatay ee uu buuggu ka hadlayo? Maxaa qaldan? Sow Dowladi ma dhismin? Sow in hubka uun dadka laga ururiyo ma harin, taasina sow tan gulufka cusub loo abaabulayo maaha, si loo soo celiyo nidaamkii iyo kala dambayntii?.". Dadkaasi, markii ay buuggan akhriyaan, bay kala ogaan doonaan kala-duwanaanshaha labadaas arrimood. Waxay kaloo ogaan doonaan in ay Soomaali ka dhuntay wax ka weyn "Dowlad Soomaaliyeed", iyo in ay hubaal tahay jeer cudurkii ay

Soomaali u dhimatay daawadiisii la helo, lagana baxo meehanawga iyo ka-warwareegidda albaabka rajada iyo badbaadada, in dowlad kastoo la dhoobdhoobo ay salka dhulka ku dhufsan doonto, baaqina lagu sii ahaan doono xaaladda marba marka ka dambaysa sii cakirmaysa ee ay Soomaali ku sugan tahay. (faahfaahinta qodobkan, buuggan oo aad akhriso uun baad kaga bogan kartaa). Sidaas darteed, waa gar baan qabaa in maanta la is weydiiyo: *Soomaaliya dib ma u dhalan doontaa?*.

Markii aan dhammeeyey akhrinta buuggan, wuxuu damiirkaygu igu baraarujiyey in ay habboon tahay, uuna mudan yahay buuggan in aan ka diyaariyo faallo gaaban oo aan ku dhiirrigalinayo dood-wadaagga qaran ee xaasaasiga ah ee uu buuggan albaabkeeda gargaraacay.

Weydiimo iyo bareerayaal ugub ah..

Sideedaba, dalalka hore-u-maray iyo kuwa tiigsanaya waxay majarahooda siyaasadeed, dhaqaale, iyo mid bulshaba saldhig uga dhigaan talooyinka iyo bareerayaasha kasoo maaxda maskaxda garwadeenkooda fekerka, kuwaasoo kaalinta ay bulshadooda ku leeyihiin uu buuggani ku qeexayo "in ay hoggaamiyaan wacyiga bulshada, waddada toosan u tilmaamaan, khataraha uga digaan, mustaqbalka sii saadiyaan, garwadeenka siyaasadda la doodaan, qudhooda wacyi-galiyaan ama wax baraan, marin-habowgana uga digaan.". Sidaas darteed, waxaa ma-dhacdo ah in dalalkaasi diyaariyaan qorsheyaal ayan ka tala-bixin, amaba ku talin garwadeenkooda fekerka, waana sirta ka dambaysa horumarkooda. Maqnaanshaha kaalintii garwadeenka fekerka Soomaaliyeed ayaa saldhig u ah majara-habowga ku dhacay qaabka ay u fekerto ummadda Soomaaliyeed. Markiise ay gabeen kuwii lahaa, waxay kaalintaasi noqotay '**ninkii lahow qaado**', waxayna si fudud ugu gacan gashay horseedayaashii xumaha iyo burburka ummadda.

Buuggan "*Dal dad waayey iyo duni damiir beeshay*" oo xambaarsan talooyin iyo bareerayaal dhiirran oo weliba ugub ah, wuxuu u muuqdaa jidbixiyeen horseed u ah baraarugga garwadeenka fekerka Soomaalida, wuxuuna kusoo beegmay xilligii loogu baahi badnaa; xilli dal dhan iyo dadkiisii uu bannaan cidla' ah kusii baaba'ayo; xilli ay waajib tahay in tacliinleyda iyo indheergaradka Soomaaliyeed ay maskaxdooda ka tuujiyaan, haddiiba ay wax ku hareen, wax uun talooyin ah oo lagu badbaadin karo ummaddan masiibadu haleeshay; xilli uu dal dhan dadkiisii gabay, ummad dhan waalatay, geyigeedii gablamay, magaceedii ba'ay, xume-ka-sheeggeeda lagu shirtago, garwadeenkeedu gablanka baday, qabkeedii ummad ahaaneedna la dilay; xilli ay ifbaxyada qaarkood muujinayaan in dunidu ayan kala jeclayn dib-u-dhalashada Soomaaliya; xilli ay gabaabsi tahay rajada laga qabi karo dib-u-yagleelidda Soomaliyadii dhimatay, taasoo ay burburinteeda iska kaashadeen damiir la'aanta siyaasiyiinteeda, dib-u-dhacsanaanta garaadka dadkeeda, iyo dibindaabyo shisheeye, sida uu buuggan qirayo.

Qoraha buuggan wuxuu daaha ka rogayaa su'aalo ugub ah oo indhowaalaba tacliinleyda Soomaaliyeed ay ka maagayeen in ay si rasmi ah daboolka uga qaadaan. Wuxuu misana raacinayaa "bareerayaal ugub ah oo looga gol-leeyahay in ay albaabka u furaan dood-wadaag dadka Soomaaliyeed wadajir ugu baadigoobaan waxa dan u wada ah, wadajirna isaga digaan waxyaalaha u laba-dibleynaya dayaca ay ku sugan yihiin waqtigan xaadirka ah". Tani waa caado aan horay looga baran tacliinleyda, waa ifafaalo ugub ah oo malaha muujinaya in uu yimid xilligii ay tacliinleydu la-wareegi lahayd kaalintoodii garwadeennimo, iyadoo la hubo haddii ay kaalintaas horay uga soo dhalaali lahaayeen in ayan ummaddani ku dhacdeen haadaanta ay sida indho la'aanta ah ugu hoobatay. Waa baraarug yididiillo leh oo uu horseed u noqday qoraha buuggan, taasoo mudan soo dhoweyn, ka-wada-qaybgal, isla-garab-gal, ka-wada-tashi, iyo wax-ku-biirin, si looga mira dhaliyo. Baraaruggan billowga ah, haddii wadajir loo garabgalo, waxaan

shaki ku jirin in uu abuuri doono dhiirranaan iyo kelyo-adayg ay tacliinleydu kula wareegaan kaalintoodii ay ka gablameen.

Buug bannaystay waddo cusub..

Waxaan horay u akhriyey buugaag kala duwan oo dad Soomaaliyeed iyo kuwo shisheeye ahba ka qoreen dhibaatada ka aloosan Soomaaliya, kuwaasoo guud ahaan dhambaalka ay gudbinayeen uu ahaa in saldhigga dhibaatada Soomaaliya tahay hardan qabiillooyinku ugu loollamayaan awoodda xukunka dalka, si ay u kala sedbursadaan khayraadka dalka. Tani waxay runtii ka fog tahay xaqiiqada dhabta ah ee ka jirta Soomaaliya. Waxaase taas kaba sii daran caado xun oo sidii daacuunkii ugu dhex faaftay Soomaalida, taasoo ah in qofkii wax uun qori karaba uu qoro wax uu ku magacaabo "Buug", kaasoo uu ku ammaanayo qabiilkiisa, islamarkaana ku caayayo qabiillada kale.

Dhanka kale, waxaa iyana beryahan soo badanayey tirada shaqsiyaad Soomaali ah oo caadeystey in ay si qaldan wax uga qoraan arrimaha Soomaaliya, iyagoo sida lagu yaqaan adeegsanaya afaf qalaad, si ayan qoraalladaasi u gaarin Soomaali badan. Ujeeddada ugu weyn ee qoraalladaas laga leeyahay ayaan dhaafsiisnayn in hay'ado ama shaqsiyaad shisheeye ah lagu beerdulucsado, been lagu haasaawiyo, kalsooni lagaga raadiyo, dhaqaale lagaga qaato, shaqooyinna looga helo. Waxaa iyana jira qoraallo qur-gooyo ah oo ay si joogto ah u faafiyaan dad ajnabi ah oo ka maalaystay darxumada iyo diifta ummadda Soomaaliyeed, haba ugu sii badnaadeen kuwa sheegta in ay caawiyaan Soomaalida. Waa la hubaa in shisheeyahaas iyo Soomaali-xumayaashaas is-biirsaday ayan marna u riyaaqi doonin Soomaaliya oo dib godka uga soo baxda. Tacliinleydii Soomaaliyeed intooda caafimaadka qabta oo looga fadhiyey in ay dalkooda iyo dadkooda ka difaacaan war-xume-tashiilkaas is ursursaday ayaa gabay kaalintoodii. Qoraallada caynkaas ah ayaa qayb ka ah jahwareerka baaxadda weyn ee beesha caalamka (intooda daacadda ah) ka haysta fahmidda saldhigga dhibaatada Soomaaliya. (Faahfaahinta qodobkan waxaad ugu tegi doontaa buuggan.)

Buuggani *"Dal dad waayey iyo duni damiir beeshay,"* wuxuu bannaystay waddo taas ka duwan oo ugub ah. Qoruhu wuxuu door biday in uu Soomaali wax ka qoro, waxna u qoro, afkooda hooyo-na ugu qoro maadaama akhristaha koowaad ee uu buuggan ugu tala-galay uu yahay Soomaali. Waana sidaasoo la hubo in qoraha buuggan ay uga hawl yaraan lahayn inuu buuggan ku qoro afka Ingiriisiga ama Carabiga, kuwaasoo uu horay ugu qoray buugaag dadka soo wada jiitey. Wuxuu kaloo qoruhu door-biday inuu ka leexdo waddadii la caadeystey ee qabiil-ku-salaynta marka la gorfaynayo dhibaatada Soomaaliya ka jirta, taasoo uu qoruhu u arko caado xun oo marin-habaabinaysa cilmi-baarista arrimaha Soomaaliya. Hase yeeshee, dad badan oo qoraha buuggan yaqaan, la-yaab kuma noqon doonto in uu buuggiisu ka feejigan yahay in uu ku sidbado dabinka ama bullaacadda qabyaaladda, sababtoo ah, ka-fayoobidda cudurka qabyaaladda, waa dhaqan uu ku caan baxay qoraha buuggan, Dr. Maxamed D. Afrax, waana sirta ka dambaysa magaca iyo maamuuska ballaaran ee uu ku dhex leeyahay ummadda Soomaaliyeed.

Yaa buuggan ka faa'iidi doona?

Sida ay waxgaradkii buuggan horay u akhriyey ku taliyeen, aniguna aan ku taageerayo, qof kasta oo ka damqanaya dhibaatada Soomaalida amaba xitaa ugu yaraan daneeya arrimaha Soomaaliya waxaa la gudboon in uu buuggan akhriyo, sababtoo ah, buuggani wuxuu – si ka duwan siyaabihii looga bartay buugaagtii ka horreysey ee laga qoray arrimaha Soomaaliya – farta ugu fiiqayaa guud ahaan "hadimooyinka uu dalkani u dhintay iyo cudurrada ubucda u ah ayaan-darrada Soomaalida ka qaadday awooddii ay ku xallisan lahayd dhibaatada haysata", wuxuuna soo bandhigayaa talooyin iyo bareerayaal ugub ah oo ku wajahan dhabbaha loo mari karo irridka badbaadada, haddiiba ay xukman tahay in la badbaadiyo wixii weli la badbaadin karo.

Dhanka kale, waxaa jira qaybo ka tirsan bulshada Soomaaliyeed oo aan u arko in ay baahi deg deg ah u qabaan, si toos ahna uga faa'iidi doonaan buuggan, waxaana qaybahaas ka mid ah: Siyaasiyiinta, hantiilayaasha, tacliinleyda, qorayaasha iyo suxufiyiinta, iyo hal-abuurka fanka iyo suugaanta. Wuxuu kaloo buuggan si toos ah ugu faa'iideynayaa garwadeenka iyo la-wadeenka reer Jabuuti, iyadoo sida la wada ogsoon yahay uu buuggan maamuus heer qaran ah ka helay garwadeenka Jabuuti.

(1) Siyaasiyiinta, hantiilayaasha, iyo tacliinleyda..

Daraasadda buuggani waxay gaashaanka ku dhufanaysaa hawraartii horay loo qaayibay ee ahayd "Soomaali iyadaa is dhigtay meesha ay taal". Hawraartan iyo kuwo kaloo la mid ah waxaa indhowaalaba loogu qiil samaynayey intii ka mas'uulka ahayd dhibaatadii dhacday, horseedkana u ahayd haadaantii laga wada hoobtay. Buuggani wuxuu qaadayaa waddo taas ka duwan. Wuxuu is-weydiinayaa su'aalihii is-weydiin la'aantoodu ay Soomaali u dhimatay, wuxuu eedda dusha u saarayaa ciddii lahayd, wuxuu soo bandhigayaa caddaymo dhab ah oo cilmiyeysan, wuxuuna af-muggii ku leeyahay "**garwadeenka ayaa ka mas'uul ah burburinta Soomaaliya iyo bi'inta magacii Soomaalida**". Intaas dabadeed, wuxuu buuggu sii faahfaahinayaa tilmaamaha seddex qolo oo uu ku magacaabay garwadeenka Soomaalida (siyaasiyiinta, tacliinleyda, iyo hantiilayaasha), iyo kaalintii uu mid waliba gaarkiis uga geystay burburinta Soomaaliya (faahfaahinta qodobkan buuggan ayaad ugu tegi doontaa.)

Sidaas darteed, xubnaha garwadeenka Soomaaliyeed (kuwii hore, kuwii dhexe, iyo kuwa hadda jiraba), waxaan kula talin lahaa in ay buuggan akhriyaan, si ay u ogaadaan eedda taariikhda u gashay ee ay ummadda Soomaaliyeed u haysato. Runtii, eeddeyntaas 'war kama noola' oo maanta su'aali kama joogto in ay qabaan iyo in kale, balse waxay doodi ka jirtaa in ay diyaar u yihiin joojinta halaagga ay weli usii horseedayaan ummaddan ba'day ee hoogtey, iyo in ay danaynayaan ka-qayb-galka dib-u-yagleelidda Soomaaliyadii ay godka ku hubsadeen, welina meydkeedii farataysanayaan. Si kastabase xaalku ha ahaadee, buuggani rajabeel kama muujinayo 'Garwadeenka Soomaaliya', wuxuuna usoo bandhigayaa talooyin ay kaga qayb geli karaan dib-u-yagleelidda Soomaaliya. (*Madax muuqda iyo mindi saawira midna lagama samro.)*

Buuggani wuxuu kaloo u faa'iideynayaa xubnihii dowladdii uu garwadeenka u ahaa Cabdiqaasim Salaad Xassan oo, sida buuggani qorayo, u-kuurgalayaashu isku wada raaceen in dhismaheedii uu ka dhashay 'hawlgalkii ugu baaxadda weynaa, ugu daacadsanaa, uguna fursad wanaagsanaa geeddi-socodka xal-u-doonka dhibaatada Soomaaliya.' Nasiibdarro, dowladdaas waa ay socon kari weyday. Buuggan ayaa si qoto dheer u gorfaynaya sababihii dowladdaas ka dhigay fadhiidka, bugtadu halka ay ka gashay, meelaha loo soo maray, iyo cidda loo adeegsaday. Sidaas daraadeed, waa la hubaa in xubnihii dowladdaas iyo taageerayaashoodiiba ay buuggan ka baran doonaan qaladaadkoodii iyo dibindaabyadii shisheeye ee lugta jiidday. Waase haddiiba ay weli kasii rajo qabaan in ay mar kale garwadeen u noqdaan ummadda Soomaaliyeed.

Dhanka kale, xubnaha dowladda cusub ee uu garwadeenka u yahay Cabdullaahi Yuusuf, waxaan kula talin lahaa in ay buuggan sadar-sadar u akhriyaan, sababtoo ah, wuxuu farta ugu fiiqayaa waddadii caga-bararka ee lagu soo hoogay, xumihii horseeday burburkii qarannimadii Soomaaliyeed, sababihii burburiyey shirarkii hore ee dib-u-heshiinta Soomaaliyeed, hadimooyinkii iyo cudurradii ay eersatay dowladdii ka horreysey ee Cabdiqaasim, iyo talooyin haddii ay raacaan la hubo in ay guul soo hoyn karaan. Waabase haddii ay maskaxdoodu ka caafimaad qabto seddexda cudur ee uu buuggani u arko "ubucda ayaan-darrada Soomaalida ka qaadday awooddii ay ku xallin lahayd dhibaata haysata." (Qabiil-ku-burur, Qori-caabud, iyo Kursi-u-qooq.)

(2) Qorayaasha, suxufiyiinta, cilmi-baarayaasha..

Maqnaanshaha kaalintii hormoodnimo ee tacliinleyda Soomaaliyeed ee ku aaddanayd hoggaaminta habka ay bulshadu u fekerto, wuxuu ragaadiyey wax-soo-saarkii qorayaasha iyo suxufiyiinta Soomaaliyeed, kuwaasoo kaalintoodu ay noqon lahayn in ay bari-taaraan haddii ay jiri lahaayeen tacliinley u midowday hoggaaminta fekerka ummaddooda. Qorayaasha iyo suxufiyiintu waxay waayeen buugaag iyo daraasado cilmiyeysan oo nadiif ka ah cudurradii la eeday. Buugaagta suuqyada yaalla waxay u bateen buugaagtii laga qoray Soomaalida ee shisheeyaha lagu xodxodanayey iyo kuwii lagu sii kala fogeynayey kala-qaybsanaanta jirta. Kuwaas waxaa weheliya buugaag-ku-sheeg uu shaqsi qabiilkiisa ku ammaananayo, kuwo kalena ku caayayo. Tani waxay sababtay in qorayaasha iyo suxufiyiintu ay ku daataan dabinkii lagu wada hoobtay ee hoseeday halaaggii ummadda, waxaana laga badin kari waayey in qoraa kasta uu reerkiisa buug u qoro, suxufi kastana uu reerkiisa weriye u noqdo. Haybaddii qoraanimo iyo tii suxufinimo halkaas bay ku dhimatay, waana sababta ugu muhiimsan ee qiima-tirtay, loona iibsan waayey buugaagta Soomaalidu qorto.

"Dal dad waayey iyo duni damiir beeshay," wuxuu jidbixiyeen u noqday waddo cusub oo ka duwan tii lagu soo jabay ee horseedday jahawareerka xilligan taagan. Wuxuu horseed ku-dayasho mudan u yahay buug-qorayaasha Soomaaliyeed ee aan danaha gaarka ah lahayn. Sidoo kale, wuxuu hal-beeg iyo manhaj ay tixraaci karaan u yahay suxufiyiinta Soomaaliyeed oo la'aa saldhig caafimaad qaba oo ay kaga shidaal qaataan diyaarinta wararka iyo faallooyinka ku saabsan Soomaaliya.

Sidoo kale, wuxuu buuggan waxtar dhinacyo badan leh u yeelanayaa cilmi-baarayaasha Soomaaliyeed kuwooda weli damiirkoodu nool yahay, sababtoo ah, wuxuu u soo bandhigayaa qaab-cilmi-bariseed ka duwan qaabkii lagu marin-habaabiyey cilmi-baarista arrimaha Soomaaliya.

(3) Hal-abuurka dhaqanka iyo suugaanta..

Buuggan, *dal dad waayey iyo duni damiir beeshay*, qolada keliya ee uu ammaan iyo bogaadin ku wajahan kaalintooda bulsho usoo jeedinayo waa hal-abuurka dhaqanka iyo suugaanta, wuxuuna caddaynayaa in ay buuxiyeen kaalintoodii, iyo weliba kaalintii ay gabeen tacliinleyda oo ahayd hoggaaminta iyo hagidda habka ay bulshadu u fekerto. Wuxuu buuggu gaarayaa illaa heer uu ku doodo *"hal-abuurkaa noo ceeb- asturay."* (Faahfaahinta qodobkan iyo caddaymihiisaba waxaad ugu tegi doontaa buuggan).

Waa hubaal, waanan ku raacsanahay qoraha buuggan, in hal-abuurku u ceeb-astureen tacliinleyda. Waxaa laga yaabaa in Soomaalida qurbaha ku nool qaarkeed ay dooddaas hadal kasoo celiyaan, waxaase si weyn uga markhaati kici doona Soomaalida gudaha joogta. Meel dheerba yeynaan u doonine, qiyaastii shan sano ka hor bay ahayd markii uu gabyaaga Cabdulqaadir Cabdi 'Shube' kula dhex wareegayey maansadiisii caanbaxay ee 'Been-ku-nool' fagaarayaasha iyo goobaha la isugu yimaado ee gobollada Puntland. Tuducyo ka mid ah maansadaas ayuu gabyaagu ku caddaynayaa baahida loo qabo is-weydiinta isla su'aalaha saldhigga u ah daraasadda buuggan: (*Taneey boodhaadhi jecel, Bal daya maanta iyo xilliga, Taariikhda waxa loo bartaa, Dhacdada loo biiriyaa, Tagtada loo baafiyaa, Kaskaagu inuu bogtaa, Abkaa budulkuu ka tagey, Intuu ku baraaray iyo, Intii baasaha lahayd, Si aan berri loo qaldamin, Su'aalaha beegista leh, waxaan ka billaabayaa, Maxaa Qarankii u burburay? Maxaa Xornimadii beddelay? Buluuglow calankayagii, Maxaa bilicdiisa dilay? Bog iyo beer wadanihii, Dorraad birmadka u ahaa, Maxay isu baaba'sheen? Billaawaha yaa u tumay? Maxaa laga booday shalay, Maantana laga bayrsan yahay? Wixii arrin naga ba'samay, Bal yeynu u haysannaa? Butdhigihii kiiska mee?).*

Sida buuggani qirayo, is-weydiin la'aanta su'aalahaas bay Soomaali u dhimatay. Xilligaas uu gabyaagu ku boorrinayey bulshadiisa is-weydiinta su'aalahaas, waxaa isaga u muuqanayey if-baxyo colaadeed oo uu kasii dardaar-werinayey. Ayaandarro,

tacliinleydii gobolladaas ee looga fadhiyey in loo baxsado, waxay badidood horboodayeen hurinta colaadda, qaarkoodna waxayba colaadinayeen gabyaagaas buuxinayey kaalintii ay ka gablameen, waana halkii uu Shube ka lahaa: *"Waxaygii oo dayacan, Ninkaan dhaho iiga daa, Hadduu i dareensadoo, Dagaallamo yeelkadii, Illeyn waan dadabsadee, Waxaase ku-diimis mudan, Damiirku la yaabayaa, Duunyada kaan wada lahayn, Dulmiga kaan u sinnayn, Darbana iga sii badnaa, Markii uu iigu dudo, Muxuu xaqa u doonayaa, Xumaanta u diidayaa, Muxuu daldalooladiyo, Dayaca u tilmaamayaa, Muxuu ula doodayaa, Duqii cidda ugu mudnaa, Oo uu dirir iyo colaad, Aniga iisoo darbado, Intuu daafaco isaga."*

Dhammaan hal-abuurka fanka iyo suugaanta, kuwii hore iyo kuwa cusub, waxaan kula talinayaa in ay buuggan akhriyaan, oo weliba u akhriyaan sadar-sadar, sababtoo ah, wuxuu xambaarsan yahay afkaartii ay sida qubanaha ah maskaxda ugu hayeen oo si cilmiyeysan la isugu duway. Gabyaaga Ilaah ku mannaystay hibada hal-abuurnimo, Cabdulqaadir Xirsi Yamyam, oo ka mid ahaa waxgaradkii buuggan falcelinta ka bixiyey ayaa qoray erayadan: "**Wixii aan gabayadayda ku sheegi jirey oo ursursan ayaad sheegtay"**. Tani waxay muujinaysaa saamaynta ay maqnaanshaha kaalintii garwadeenka fekerku ku yeelatay tacab-soosaarkii hal-abuurka fanka iyo suugaanta, iyo sida ay labadaas kaalimood isugu dhisaalan yihiin.

Hal-abuurka fanka iyo suugaanta, wuxuu buuggan u noqonayaa diirrad ay ku eegaan soo-yaalka taariikhda socota, xumihii dhacay, ciddii ka dambeysey, iyo sida looga bixi karo. Waa hubaal in buuggan uu furfuri doono kartidooda hal-abuurnimo, ayna ka dhigan karaan manhaj aan duugoobin oo ay kaga shidaal qataan dhambaallada ay ku gudbinayaan hal-abuurkooda, iyo hub ay isaga difaacaan "shahaado-xambaarayaasha" ay u ceeb-astureen ee misana doodda, xaqiraadda, iyo cilaaqtanka ula soo taagan.

Ugu dambayn, waa la hubaa in hal-abuurkii buuggan akhriya uu si fudud u godlan doono. Xaggeese hal-abuur ku jiraa, waxaaba ku godladay nin aan weligiis curane. Aqoonyahan lagu magacaabo Maxamed Cabdulqaadir Eenow oo ka mid ahaa waxgaradkii buuggan falcelinta ka bixiyey ayaa qoray erayadan: **"Sida uu ii dhaqaajiyey buuggan, wuxuu iga keenay gabay!"**.

(4) Buuggii ugu horreeyey ee helay maamuus heer qaran ah..

Waxtarka ballaaran ee uu buuggan leeyahay waxaa durba aqoonsaday, hoostana ka xarriiqay garwadeenka siyaasadda Jabuuti. Dabayaaqadii bishii Febraayo ee sanadkan 2005ta, waxaa magaalada Jabuuti lagu qabtay xaflad lagu daah-furayey daabacaaddii labaad ee buuggan, taasoo uu madaxweynaha Jabuuti, Ismaaciil Cumar Geelle, si gaar ah ugu maamuusay qoraha buuggan. Munaasabaddaas oo ay kasoo qayb galeen xubno ka socdey dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada, waxaa dadkii ka hadlay ka mid ahaa madaxweynaha Jabuuti oo yiri: "Waa buug aad u qiima badan. Anigu nus maalin baan ku dhammeeyey akhriskiisa, dhowr saacadood uun bay iga qaadatay, maxaa yeelay, markaan billaabay waan iska qaban kari waayey..". Ummaduhuse kala nasiib badan, ummadna wuxuu Ilaahay ku salladay habaarqabe aan waxna akhriyin, waxna qorin ee uun u taagan luggooyadooda, ummad kalena wuxuu Ilaahay ku galladay ducaqabe, sida Ismaaciil Cumar Geelle, u heellan horumarintooda, nus maalinna ku dhammeeyey akhriska buug ka kooban 245 bog!

Buuggan waa kii ugu horreeyey ee dalka Jabuuti loogu sameeyo xaflad weyn oo daah-fur ah, waxayna taasi ka dhigtay buuggii ugu horreeyey ee la siiyey maamuus heer qaran ah. Tani waxay muujinaysaa heerka uu gaarsiisan yahay wacyiga iyo baraarugga garwadeenka Jabuuti iyo sida ay ugu heellan yihiin gudashada xilkooda garwadeennimo. Sidaasoo ay tahay, waxaan si gaar ah u dhiirrin lahaa in dhammaan garwadeenka iyo la-wadeenka Jabuuti labadaba lagu baraarujiyo akhrinta buuggan oo aan hubo inuu u noqonayo muraayad ay ka daawan karaan wixii Soomaaliya dhulka dhigay, welina u

diiddan in ay ka kacdo. Dhanka kale, wuxuu ku hubaynayaa waaya'aragnimo dheeraad ah oo ay kaga feejignaadaan in gudaha iyo dibeddaba lagula soo galgasho tabcooyinkii lala helay Soomaaliya. Waxaa muhiim ah in akhriska buuggan lagu dhiirrigaliyo dhammaan qaybaha bulshada ee ku kala sugan gobollada iyo degmooyinka dalka. Waxaase ayaan-darro noqon doonta in buug sidan oo kale waxtar ugu leh reer Jabuuti uu akhriskiisa ku koobnaado siyaasiyiinta iyo tacliinleyda oo qura.

Ugu dambayn, waxaan shaki ku jirin in akhriska buuggan uu sii kobcin doono garaadka dadka reer Jabuuti, taasoo iyana sii xoojin doonta is-afgaradkii u dhexeeyey garwadeenka iyo la-wadeenka ummadda Jabuuti.

Dhaliilaha buugga

Buug kasta wuxuu leeyahay dhaliillo. Sida qoraha buugguba qiray, in afka Ingiriisiga wax lagu qoro ayaa in badan ka sahlan in af-Soomaali wax lagu qoro, sababtoo ah, af-Soomaaligu waa af aan weli qoraal xasilay yeelan, dhib badanna lagala kulmo marka la damco in lagu qoro wax cilmiyeysan. Haddaba, sida uu qoraha buuggu kusii afeeftay, waxaa dadaal weyn loo galay sidii loo turxaan bixin lahaa qaladaadka xagga garaacista qoraalka buuggan. Sidaasoo ay tahay, markaan buuggan akhrinayey waxay weli indhahaygu qabanayeen jumlado iyo erayo markii la garaacayey qaldamay, markii la saxayeyna laga ilduufay. Dhaliisha kale ee buuggan ee malaha sida sibiqda ah iyana looga ilduufay ayaa ah in xarfo af-Ingiriisi ah loo adeegsaday tiro-siinta cinwaan-hoosaadyada cutubyada buugga, sida (a, b, c, d, e, f…), halkii ay ahayd in la adeegsado xarfo af-Soomaali ah, sida (b, t, j, x, kh, d…). Sidaas darteed, maadaama buuggu ku qoran yahay af-Soomaali, waxay ahayd in dhinac kasta laga soomaaliyeeyo intii la awoodi karey.

Hadda iyo dan…

Buuggan "*Dal dad waayey iyo duni damiir beeshay*" wuxuu si adag ugu doodayaa "inta uu dadka maskaxda ka haysto dhaqan-siyaasadeedkii dhibaatadan dhaliyey," kaasoo astaamihiisa uu buuggan ku tilmaamayo 'qabiil-ku-burur', 'qori-caabud', iyo'kursi-u-qooq' in dadaal kasta oo xal waara loogu raadinayo Soomaaliya uu noqonayo 'Hal bacaad lagu lisay' haddaan mudnaanta koowaad la siin joojinta dhaqan-siyaasadeedka astaamahaas leh. Wuxuu buuggan ku adkaysanayaa in baahi weyn loo qabo in marka hore dadka maskaxdooda laga nadiifiyo cudur-bulsheedyadaas caqabadda ku ah dadaal kasta oo is-beddel-doon ah, wuxuuna soo bandhigayaa bareerayaal ugub ah oo maskaxda bulshada looga mayri karo dhaqan-siyaasadeedkaas ay u dhimatay, lana dhaqaaqi la'dahay.

Dunida inteeda kale, meelaha dhibaatooyinku ka dhacaan, intaan wax-ka-qabadkooda loo gudbin, waxaa hawlgalka xal-doonka ah lagu bilaabaa cilmi-baaris iyo aqoon-wadaag looga dan leeyahay in lagu iftiimiyo qaababka wax loo qaban karo. Buuggan wuxuu ayaandarro ku tilmaamayaa "in aan dhowr iyo tobaneeyo sano hal mar la isku dayin hal shirweyne oo si cilmi ah loogu baaro sababaha dhaliyey dhibaatada dalkaan ka taagan iyo siyaalaha xal loogu heli karo".

Si kastabase arrintu ha ahaatee, haddii shalay waxgaradkii Soomaaliyeed uusan taladaas Ilaah solonsiin, buuggan ayaa maanta hoosta ka xarriiqaya baahida loo qabo shirweyne dood-wadaag qaran oo aan ahayn "mid **"dowlad"** lagu dhisayo ee ah mid **"dad"** lagu dhisayo, maskax lagu dumayo, laguna cillad-bixinayo marinkii dowladnimo dhab ah loo abbaari lahaa." (Hindisahan oo faahfaahsan waxaad ugu tegi doontaa buuggan).

Ugu dambayn, dhammaan waxgaradkii akhriyey, ama akhrin doona buuggan, waxaa looga fadhiyaa dhaqaajinta hindisahan ugubka ah. Waabase haddii ay jiraan jidbixiyeen

leh kasmo iyo karti ku filan ku-dhaqaaqidda tallaabo dhumucdaas leh! *"Baraarujin aayeliyo, Waxaan jrin baaq waddaninimo, Dadkiisa u soo bandhigay, Si ay berri ugu hirtaan, Bur bay ku jirtaa arrini, Kan bixiyaa waa sugaal…"(Cabdulqaadir Cabdi Shube)*

Dhammaad

Cabdulqaadir M. Wacays
cmwacays@yahoo.com